Ogeysiiska Istacmaalka Xogta Dhowrsan

Ogeysiiskaan Wuxuu Dhaqan Galayaa Bilowga Oktoobar 1, 2013

FADLAN SI TAXADAR LEH U EEG

OGEYSIISKAAN WUXUU TILMAAMAYAA SIDA XOGTA SHAKHSIYADEED EE LA OGAAN KARO OO ADIGA KUUGU SAABSAN LOO ISTICMAALI KARA AMA LOO BANDHIGI KARO IYO SIDA AAD KU HELI KARTID MACLUUMAADKAAN.

Vermont waxey sameysay adeegga Vermont Health Connect ("VHC") si ay uga caawisa shakhsiyaadka iyo ganacsiyada inay soo iibsadaan ceymis caafimaad. Mid ka mid ah waxyaabaha laiiska rabo si loo sameeyo VHC waa Vermont oo balan qaadeysa iney ilaaliso dhowrsanaanta xogta shakhsiyadeed ooy u baahantahay si shakhsiyaadka iyo ganacsiyada ay ugu diiwaan geliso ceymis. Ogeysiiskaan ee Dhowrsanaanta Xogta ("Ogeysiis") wuxuu cadeynayaa waxa Vermont ay sameyneyso si ay u ilaaliso xogta shakhsiyadeed.

Ogeysiiska wuxuu raacayaa Sharciga Dhowrista Xogta Bukaanka iyo Daryeelka Qiimaha Jaban ("ACA"), taas oo la xiriirta uruurinta, isticmaalka, soo bandhigidda iyo keydinta xogta qofka lagu aqoonsan karo ee ("PII") ee VHC.

Vermont Health Connect waxey ku taaleysaa Waaxda Vermont ee Helitaanka Caafimaadka ee Shirkadda Adeegyada Baniaadamka. Vermont waxey balan qaadeysaa iney ilaaliso dhowrsanaanta xogta PII ayna ku xirto shirkadda Adeegyada Baniaadamka iyo sidoo kale qandaraasleydeyda iyo kafaalayaasha.

ADEEG TURJUBAAN BILAASH AH AYAA LA HELI KARAA

Fadlan noo sheeg haddii aad u baahantahay turjubaan ama adeeg kale si aad u akhrisatid aadna u fahamtid ogeysiiskaan. Wac: ***1-(855) 899-9600***

Cette lettre est importante. Si vous ne la comprenez pas, apportez-la a votre bureau local pour recevoir de l'aide. Call: ***1-(855) 899-9600***

Esta carta es importante. Si no la entiende, llevela a su oficina local para solicitor ayuda. Call: ***1-(855) 899-9600***

Ovaj dopis je vazan. Ukoliko je nerazumljiv za vas onda ga ponesite l obratite se lokalnoj kancelariji za pomoc. Call: ***1-(855) 899-9600***

Barua hii ni muhimu. Kama huielewi, ichukue, uende nayo katika ofisi yako ya karibu kwa msaada zaidi. Call: ***1-(855) 899-9600***

Dokumentigan ama qoraalkan waa muhiim. Haddii aadan fahmin, waxaad u qaadaa xafiiskaaga degaanka si aad caawimaad u hesho. Call: ***1-(855) 899-9600***

यो दस्तावेज महत्त्वपूर्ण छ। यदि तपाईले यसलाई बुझ्नुभएन भने, महतको लागि यसलाई आफ्नो स्थानीय कार्यालयमा लिएर जानुहोस्। Call: ***1-(855) 899-9600***

ဤစာရွက်စာတန်းသည် အရေးကြီးပါသည်။ သင်နားမလည်လျှင်၊ သင်၏နယ်မြေရုံးခန်းသို့အကူအညီရရန် ယူဆောင်သွားပါ။ Call: ***1-(855) 899-9600***

HOWLAHA DHOWRISTA XOGTA SHAKHSIYADEED EE LAGU AQOONSAN KARO QOFKA

MAXEY TAHAY XOGTA LAGU AQOONSAN KARO SHAKHSIGA EE ("PII")?

Tani waa xog walbooy sameeyso ama ay hesho Shirkadda Vermont ee Adeegyada Baniaadamka, qandarasleydeyda iyo kafalaayaasha ("AHS") oo loo isticmaali kara si gaar ah in laguugu aqoonsado (sida magacaada iyo kaarkaaga adeegyada bulshada), ama si wadajir ah loola isticmaali karo macluumaadka kale oo adiga laguula xiriirin kara (sida magaca hooyadaa) si laguugu aqoonsado. Miithaalada PII waa:

- Magaca
- Nambarka Kaarka Adeegga Bulshada
- Taariikhda iyo goobta aad ku dhalatay
- Cinwaanka
- Telefoon Nambar
- Macluumaadka Kombyuutarka lageliyo, sida faraha
- Cinwaanada iimaylka
- Nambarada Kaarka Lacagta

MAXEY TAHAY XOGTA PII OO AHS AY IGA QAADEYSO OOYNA U URUURINEYSO VHC?

AHS waxey uruurin kartaa macluumaad sida magacaada, cinwaankaaga, kaarka adeggyada bulshada, macluumaadka canshuurta gobolada ee la xiriira dakhliga qoyskaaga, xogta wadaniyadda, xogta isdiiwaan gelinta, uurka, ama naafanimada.

AHS **kama** uruurineyso macluumaad caafimad keydkaaga xogta caafimaadka, daryeel caafimaad bixiyahaada iyo ceymiskaaga. Xogta caafimaadka la geliyo VHC, haddii ay jirto, wey kuugu ekaan doontaa adiga ayeyna kaa imaan doontaa.

AHS MAXEY KU SAMEYNEYSAA XOGTEYDA PII?

AHS waxey uruurineynsaa, isticmaaleysaa ayna keydineysaa macluumaadkaaga si laguugu caawiyo inaad hesho aadna isaga diiwaan geliso ceymis caafimaad oo qiimahiisa aad goyn karto. AHS waxey uruurineysaa xogta ugu yar ee loo baahanyahay ee PII si ujeedkaan loo gaaro.

AHS waxey u isticmaali kartaa xogtaada PII si ay:

- U go'aamisay u qalmidda iska diiwaan gelinta mid ka mid ah qorshooyinka caafimaad oo lagu iibin karo VHC;
- U go'aamisay u qalmidda dheefta barnaamijyada kale sida Medicaid;
- U go'aamisay u qalmidda taageera dhaqaala; iyo
- Ku howlanaanta xakameynta tayada iyo wanaajinta howlaha.

MA ANIGA KELI AYAA AH ISHA XOGTEYDA PII?

Ma aha. AHS waxey uruurin kartaa macluumaad qaar oo ka socdo ilaha xogta gobolada ama maamulada, sida barnaamijka Medicaid ama IRS. Xogta qaar ee shirkadaha soo sheega deymaha waxaa sidoo kale loo isticmaalayaa si loo hubiyo aqoonsiga.

MAXEY YIHIIN XUQUUQDEYDA KU SAABSAN ISTICMAALKA XOGTEYDA PII?

- **Xaqqaada Helitaanka Xogta PII.** Waxaad codsan karta si aad u aragto ama aad u hesho nuqul wakhti haboon la bixiyay oo xogtaada PII ah iyadoo qaab walba ah ood akhrisan karto. Si aad u hubiso in xogtaada PII aan si aan habbooneen loogu soo bandhigin, AHS waxey xaqiijineysaa aqoonsigaada, ama aqoonsiga shakhsiga codsanaayo xogtaada PII si loo hubiyo inaad isaga ama iyada aad u ogolaatay inuu helo xogtaada PII, fadlan la xiriir Sargaalkeena Dhowrsanaanta Xogta adoo isticmaalaya macluumaadka wada xiriirida ee hoose.

- **Xaqqaada Sixidda**. Waxaad xaq u leedahay inaad diido saxnimada ama dhab ahaanta xogtaada PII wakhti habbon, iyo si aad u hesho macluumaad sixidda macluumaad khalad ah iyo in cabashaddaa la qoro haddii codsigaada laguu diido.

- **Xaqqaada Dooqa Shakhsiyadeed**. Waxaad xaq u leedahay inaad lahaato fursad macquul ah si aad u sameysid go'aan adoo wax badan ka og uruurinta, isticmaalka iyo bandhigidda xogtaada PII. Haddii

wax su'aala ah aad qabtid oo ku saabsan xogtaada PII, fadlan la xiriir Sargaalkeena Dhowrsita Xogta adoo isticmaalaya macluumaadka wada xiriirida ee hoose.

- **Xaqqaada Isticmaalka Xogta Xadidan ee PII**. Waxaad xaq u leedahay inaad rajeyso in xogtaada PII loo sameeyo, loo isticmaalo, ayna soo bandhigto VHC si loo gaaro ujeedka kooban ee helidda iyo iska diiwaan gelintaada daryeela caafimaad oo qiimahiisu aad goyn kartid iyo inaan loo isticmaaleynin in si sharci dara ah laguugu takkooro.

- **Xaqqaada Xogta Tayeysan iyo Daacadnimo**. Waxaad xaq u leedahay tilaabooyin macquul ah si aad u hubiso in xogtaada PII ay ahaato mid dhameystiran, toosan macluumaadkana ay yihiin kuwii ugu dambeeyay, iyo iyadoon wax lagu darin ama la badalin ama loo sameeyay qaab aan habooneen.

- **Xaqqaada Xog Dheeri ah.** Haddii aad jeceshahay inaad hesho xog dheeri ah oo ku saabsan xaqqaada dhowrsanaanta xogtaada, ama aad ka walwal santahay inaan ku xadgudubnay xuquuqdaada dhowrsanaanta xogta, ama aadan nagu raacsaneyn go'aan aan sameynay oo ku saabsan helitaanka xogtaada PII, waxaad la xiriiri kartaa Xafiiska Xog Dhowrista.

XUQUUQDEENA BADALIDDA SHURUUDAHA OGEYSIISKAAN

Waxaa laga yaabaa inaan badalno shuruudaha Ogeysiiska wakhti walba. Haddii aan badalno Ogeysiiskaan, waxaa laga yaabaa inaan ka dhigno shuruudaha cusub ee ogeysiiska oo saameyn doono dhammaan macluumaadkaaga een keydnay, aan sameynay ama aan helnay ka hor inta aanan bixin ogeysiiska cusub. Ogeysiis walboo cusub waxaan ku soo daabici doonaa weebsaytkeena. Waxaad sidoo kale heli kartaa ogeysiis walboo cusub adoo la xiriiraaya xafiiska Dhowrsanaanta Xogta.

WIXII SU'AALA AH OO KU SAABSAN OGEYSIISKAAN AMA KU SAABSAN XUQUUQDAADA, IYADOOY KA MID TAHAY XUQUUQDA RAFCAANKA WAXAAD NAGALA SOO XIRIIRI KARTAA:

Xarunta Xiriirada ee VHC
Telefoon, at **(855) 899-9600**, or
Iimayl, AHS.PrivacyandSecurity@State.vt.us